USDA Food and Nutrition Service
U.S. DEPARTMENT OF AGRICULTURE

# Sida loo Dalbado Cuntooyinka Bilaashka ah iyo Qiimaha Jaban ee Dugsiga

Fadlan isticmaal tilmaamahan si aad u buuxiso arjiga cuntooyinka dugsiga ee bilaashka ah iyo qiimaha jaban. Waa inaad kaliya usoo gudbisaa hal arji qoyskiiba, **xataa hadii caruurtaada ay dhigtaan wax ka badan hal dugsiga oo ku yaal [Insert School District here].**

Arjiga waa in la buuxiyo si loo ogaado u qalanka ilmaha(caruurta) ee cuntooyinka dugsiga ee bilaashka ah ama qiimaha jaban. Fadlan u raac tilmaamahan siday u kala horeeyaan! Talaabo kasta oo tilmaamaha ah waxay lamid tahay talaabooyinka arjigaaga. Hadii aad marna ka shakido waxa xiga ee aad samaynayso, fadlan la xidhiidh [Insert School/School District contact here; phone and email preferred].

**Fadlan isticmaal qalin (maaha qalin beensal) marka aad buuxinaso arjiga oo waxa aad samaysaa waxa aad awoodo si aad u wanaagsan ugu qorto.**

## Talaabada 1: Ku qor <u>DHAMAAN</u> caruurta, sabiyada, iyo ardayda oo waxa aad ku dartaa ilaa fasalka 12 aad.

Noo sheeg tirada caruurta/sabiga ah, caruurta aan ku jirin dugsiga, iyo ardayda dugsiga hoose/dhexe/sare ee qoyskaaga. MAAHA khasab inay qaraabo yihiin si ay qoys iskugu noqdaan.

**Yay tahay in aan ku qoro halkan?** Marka aad buuxinayso qaybtan, fadlan waxa aad ku qortaa DHAMAAN xubnaha qoyskaaga ee aad:

- Caruurta 18 jirka ah ama ka yar IYO quuta dakhliga qoyska;
- Aad adigu hayso sida ay amartay maxkamada ama hay'ada gobolka/deegaanka ah, ama ah bilaa guri, soo galayti , ama qof dhalinyar ah oo qoyskiisa kasoo baxsaday;
- Ardayda dhigata (<u>intay doonaan ha le'ekaadaan)</u> [Insert School/School system here].

| | | | |
|---|---|---|---|
| **A) Ku qor magaca ilmo kasta.** Ku qor magaca daabacan ee ilmo kasta. Isticmaal hal layn arjiga ilmo kasta. Marka aad ku qorayso magacyada, ku qor hal xaraf sadnuuqiiba. Jooji hadii ay meeshu kaa dhamaato. Hadii ay jiraan caruur kale oo ay tiradoodu ka baxato laymanka arjiga, waxa aad ku lifaaqdaa warqad kale (ama arji labaad hadii aad ku buuxinayso elektoroonig ahaan) oo ay la socdaan dhamaan macluumaadka caruurta dheeraadka ah. Tani sidoo kale waxay khusaysaa dadka waawyan ee ku jira Talaabada 3. "MI" ee loosoo gaabiyay magac dhexe. Waxa aad ku qortaa xarafka kowaad ee ilmo kasta magiciisa dhexe sanduuqa. | **B) Ilmuhu ma ardaybaa?** Hadii ay "Haa" tahay heerka fasalka ee ardayga ku jira qaybta "Fasalka" ee midigta. | **C) Miyaa leedahay wax *Foster Child*?** Hadii wax caruur ahi ay ku qoran yihiin caruur aad korsato foster *Child*, waxa aad ku sumadaysaa "*Foster Child*" sanduuqa ku xiga magaca ilmaha. Hadii aad KALIYA dalbanayso *Foster Child*, kadib marka aad dhamayso **Talaabada 1**, qabo **Talaabada 4**.<br><br><u>*Foster Child* ee adiga kula nool waxaa loo tiriyaa</u> sida <u>qoyska waa in lagu qoro arjiga</u>. Hadii aad u dalbanayso caruurta la korsado iyo kuwo aan la korsanin, qabo Talaabada 3. Oggow: Caruurta cid gaar ah laga soo qaatay looma arko Foster Child ee ay dawladu kugu qortay. *Foster Child* waxaa weeye ilmo aan gaan gaarin oo uu la wareegay gobolku isla markaana uu ku wareejiyay qof wayn oo liisan ka haysta gobolka, ee ilmaha u daryeela sida waalidka ama koriyaha. | **D) Wax kamid caruurtu ma bilaa Guri, soo galayti ama dadka baxsaday?** Hadii aad u aragto wax caruurta ah oo ku qoran qaybtan inay buuxiyeen sharaxa, waxaad calaamadigaa sanduuqa "Bilaa Guri, Soo galayti, Guriga Kasoo Baxsaday" ee ku xiga magaca ilmaha oo <u>buuxi dhamaan talaabooyinka arjiga</u>. Xaalada Bilaa Guri, Soo galayti, Kasoo Baxsaday Guriga <u>ah waa inay xaqiijiyaa</u> shaqalaha barnaamijka ee munaasabka ahi. Hadii degmo dugsiga ay xaqiijin kari waydo xaaladaada bilaa guriga, soo galayti ama kasoo baxsashada guriga, markaa degmada dugsiga ayaa kula soo xidhiidhi doonta si aad u buuxiso arjiga ku salaysan dakhliga. <u>Waxa aad dooran akrtaa inaad bixiso macluumaadka iminka</u> si aad uga hortagto in degmo dugsigu ay marka danbe ay u baahato inay hadhaw kula soo xidhiidho. |

## Talaabada 2: Miyaa wax kamid ah xubnaha qoysku ku jiraaan wakhtigan SNAP, TANF, ama FDPIR?

**Hadii wax kamid ah qoyskaaga (marka macal adiga lagugu daro) aad wakhtigan ku jirtaan mid ama wax ka badan barnaamijyada kaalmada ee hoos ku qoran, caruurtaada waxay u qalmaan cuntooyinka bilaashka ah ee dugsiga:**

- Barnaamijka Kaalmada Cuntada Dheeraadka ah (The Supplemental Nutrition Assistance Program, SNAP) ama [Insert State SNAP].
- Kaalmada Kumeel Gaadhka ah ee Qoysaska Baahan (Temporary Assistance for Needy Families, TANF) ama [Insert State TANF here].
- Barnaamijka Qaybtan Cuntada ee Seeraha Hindida (The Food Distribution Program on Indian Reservations, FDPIR).

**A) Hadii cidna qoyskaaga ayna ku jirin barnaamijyada kor ku qoran:**

- Sax "Maya" **Talaabada 2** oo qabo **Talaabada 3.**

**B) Hadii cid qoyskaaga ah ay ku jirto wax kamid ah barnaamijyada kor ku qoran:**

- Ku qor lambarka kiiskaaga SNAP, TANF, ama FDPIR. Waxa aad kaliya u baahan tahay hal lambar kiis. Hadi aad ku jirto hal kamid ah barnaamijyadan oo aanad garanaynin lambarka kiiskaaga, la xidhiidh: [Insert State/local agency contacts here].
- Qabo **Talaabada 4**.

## Talaabada 3: Ku qor DHAMAAN xubnaha qoyska iyo dakhliga xubin kasta oo qoyska ah

**Sidee ayaan u sheegi karaa dakhligayga?**

- Isticmaal liiska ay ku qoran tahay **"Isha Dakhliga"** iyo **"Tusaalayaasha Dakhliga Caruurta,"** ee dhanka danbe ee foomka macluumaadka si loo eego hadii qoyskaagu uu leeyahay dakhli ay tahay inuu ka warbixiyo.
- Ka warbixi dhamaanxadiga WADARTA DAKHLIGA KALIYA. Ka warbixin dhamaan dakhliga oo ah lacag. Haku darin sanaatida.
  - Wadarta dakhliga waxaa weeye wadarta dakhliga ee la heley **kahor** cashuurta iyo wixii la iska jarayo.
  - Dadka badan ayaa u arka in xadiga ay "u qaadanayaan guriga" oo ma eegaan wadarta xadiga" dakhliga". Waxa aad xaqiijisaa in dakhliga aad ku sheegeyso arjigan AANAy yaraynin cashuurtu, kharashka caymisku, ama wixii kale ee lacag ah ee lagaa jaro.
- Ku qor "0" wixii qaybo ah ee ayna jirin dakhli laga warbixiyo. Wixii qaybaha dakhliga ee isaga oo madhan laga tagay ama banaan waxaa sidoo kale loo arkaa inay tahay eber. Hadii aad ku qortaa '0' ama aad isaga oo madhan dhaafto, waxa aad xaqiijinaysaa (balan qaadaysaa) inayna jirin wax dakhli ah oo aanad sheegin. Hadii saraakiisa deegaanku ay ka shakiyaan in dakhliga qoyskaaga ee aad ka warbixinsay inayna saxnayn, arjigaaga waa la baadhi doonaa.
- Waxa aad ku sumadaysaa inta jeer ee dakhliga aad heshey adiga oo isticmaalaya sanduuqa la saxayo ee dhanka midig ee qayb kasta.

### 3.A. Warbixinta dakhliga soo galay dadka waawayn

**Yay tahay in aan ku qoro halkan?**

- Marka aad buuxinayso qaybtan, fadlan waxa aad ku qortaa DHAMAAN xubnaha dadka daawayn ah ee qoyskaaga ee kula nool oo waxa aad wadaagtaa dakhliga iyo kharashka, xataa hadii aynaad qaraabo ahayn xataa hadii ayna lahayn dakhli iskood oo soo gala.
- ***HAKU darin:***
  - Dadka kula nool laakiin aanu idinka dhaxaysnin dakhliga qoyskaagu IYO aan waxba ku darsan dakhliga qoyskaaga.
  - Caruurta sabiga ah, caruurta iyo ardayda hore loogu qoray **Talaabada 1.**

## Talaabada 3: Ku qor DHAMAAN xubnaha qoyska iyo dakhliga xubin kasta oo qoyska ah

**1) Ku qor magacyada xubnaha qoyskaaga ee waawayn.**
Magaca daabacan ee xubin kasta oo qoyska ah sanduuqa ay ku qoran tahay "Magacyada Xubnaha Qoyska ee Waawayn (Magaca Kowaad iyo Sadexaad)" Waxaa kamid ah ardayda kuuliyada, iyada oo lagu qoro moojee cid madax banaan cashuurta (dhamaan ardayda kuuliyada waxaa loo arkaa dadka waawayn). Haku qorin wixii xubnaha qoyska ah ee ku qoran **Talaabada 1**.

**2) Liiska dakhliyada shaqada.**
Liiska dhamaan shaqada "Dakhliga Shaqada" qaybta ah ee arjiga. Tani waxaa weeye caadiyan lacagta laga helo shaqooyinka. Hadii aad iskaa u shaqaysato ama mulkiile beer tahay, waa inaad soo sheegto dakhliga rasmiga ah ee kusoo galay. Dakhliga rasmiga ah waxaa weeye dakhliga kadib cashuurta iyo wixii lagaa jarayo.

- ***Sidee ayay noqonaysaa hadii aan ka shaqeeyo dhawr shaqo?*** Ku qor shaqo kasta adiga oo gelinaya magacaaga iyo dakhliga shaqo kasta layn cusub. Xaashi dheeraad ah oo warqad ah ku dar hadii loo baahdo.
- ***Sidee ayay noqonaysaa hadii aan is u shaqaysto?*** Ku qor dakhliga ganacsigaaga ee rasmiga ah. Dakhligan rasmiga ah waxaa loo xisaabiyaa iyada oo laga jarayo kharashka shaqada ee ganacsigaaga wadarta wixii kusoo galay (dakhliga). Wadarta dakhliga ama dakhliga waxaa weeye dhamaan dakhliga kaasoo galay iibka wixii alaabaad ama adeegyo ah.

Hadii ilmuhu uu ku qoran yahay **Talaabada 1** uu leeyahay dakhli, raac tilmaamaha**Talaabada 3, Qaybta B.**

**3) Qor dakhliga kaalmada shacabka/Biilka Ilmaha/Masruufka.**
Ku qor dhamaan dakhliyada khuseeya qaybta "Kaalmada Shacabka/Biilka Ilmaha/Masruufka" ee arjiga. Hasoo sheegin wixii xadi lacageed ah ee kaalmada shacabka gunooyinka AAN ku qornayn shaxda. Hadii dakhliga laga helo biilka Ilmaha ama biilka xaaska, kaliya waxa aad sheegtaa lacagta ay amartay maxkamad. Lacagta aan rasmiga ahayn laakiin joogtada ah waa in lagu sheegaa dakhliga "kale" ee qaybta xigta.

**4) Ku qor dakhliga hawlgabka/dhamaan dakhliga kale.**
Ku qor dhamaan dakhliga khuseeya qaybta "Hawlgabka/Dhamaan Dakhliga Kale" ee arjiga.

- ***Sidee ayay noqonaysaa hadii aan ka helo dakhli dhawr ilood oo qaybtan ah?*** Ku qor il kasta adiga oo gelinaya magacaaga iyo dakhliga ile kasta layn cusub. Xaashi dheeraad ah oo warqad ah ku dar hadii loo baahdo.

**5) Ku qor wadarta cabirka qoyska.**
Geli wadarta tirada xubnaha qoyska ee qaybta "Wadarta Xubnaha Qoyska (Caruurta iyo Dadka Waawayn)". Lambarkan WAA inuu lamid noqdo tirada xubnaha qoyska ee ku qoran **Talaabada 1** and **Talaabada 3**. Hadii ay jiraan wax xubno oo qoyskaaga ah oo aan ku qornayn arjiga, ku noqo oo ku dar. Waxaa aad muhiim u ah in aad ku qorto dhamaan xubnaha qoyskaaga, qaybta xajmiga qoyskaaga ee saamaynaysa u qalankaaga cuntooyinka bilaashka ah iyo qiimaha jaban.

**6) Waxa aad sheegtaa afarta god ee ugu danbeeya ee Lambarkaaga Sooshaal Sekuuritiga.**
Xubinta qoyska ee wayn waa inay gelisaa afarta god ee ugu danbaysa ee Lambarkeeda Sooshaal Sekuuritiga meesha la siiyay. Waxa aad u qalantaa inaad dalbato gunada xataa hadii aanad lahayn Lambarka Sooshaal Sekuuritiga. Hadii wax kamid ah xubnaha qoyskaagu ayna lahayn Lambarka Sooshaal Sekuuritiga , iyada oo banaan iska dhaaf oo waxa aad saxdaa sanduuqa ay ku qoran tahay "Sax hadii aanad lahayn Lambarka Sooshaal Sekuuritiga."

### 3.B Ku qor dakhliga ay heleen caruurtu

**Ku qor dhamaan dhakhliga ay heleen ama ay qaateen caruurtu.**
Ku qor wadarta dakhliga ee DHAMAAN caruurta ku qoran **Talaabada 1** ee qoyskaaga sanduuqa saxan ee "Dakhliga Ilmaha". Kaliya waxa aad ku dartaa *Foster Child* ee leh dakhliga hadii aad wada dalbanaysaan inta kale ee qoyska.

- ***Waa maxay Dakhliga Ilmuhu?*** Dakhliga ilmuhu waxaa weeye lacag laga helo cid ka baxsan qoyskaaga oo TOOS loo siiyo caruurtaada. Qoysas badan malaha wax caruur ah oo dakhli leh.

| Talaabada 4: Macluumaadka xidhiidhka iyo saxeexa qofka wayn | | |
|---|---|---|
| ***Dhamaan arjiyada waa inay saxeexdo xubinta qofka wayn ee qoysku. Marka aad saxeexdo arjiga, in xubinta qoysku waxay balan qaaday in dhamaan macluumaadka ay bixisay uu run yahay oo uu dhamaystiran yahay. Kahor inta aan la buuxin qaybtan, fadlan sidoo kale waxa aad xaqiijisaa inaad akhriday bayaanka ku qoran dhabarka arjiga.*** | | |
| **A) Bixi macluumaadka xidhiidhak.** Waxa aad ku qortaa cinwaanka boosta ee wakhtigan qaybta lagu siiyay, hadii macluumaadka aad heli karto. Hadii aanad lahayn macluumaad rasmi ah, waa iska caadi. Wadaagista lambarka taleefanka, cinwaanka limeelka ama labaduba waa ikhtiyaar, laakiin waxay naga caawisaa in aanu si dhakhsi ah kuula soo xidhiidhi karto hadii aanu kuu baahano. | **B) Ku qor oo ku saxeex magacaaga oo ku qor taariikhda maanta.** Ku qor magaca qofka wayn ee saxeexa arjiga oo qofku ha saxeexo sanduuqa "Saxeexa qofka wayn." | **C) Usoo dir arjiga aad buuxisay:**<br>Insert<br>School/District<br>address here |

| Ikhtiyaar |
|---|
| **Noo sheeg qoomiyada iyo isirka caruurta (waa ikhityaar).** Dhabarka arjiga, waxa aanu kaa dalbanaysaa inaad nagula wadaagto macluumaadka qoomiyada iyo isirka caruurtaada. Qaybtan waa ikhtiyaar oo ma saamayn doonto u qalanka ilmahaaga ee cuntada bilaashka ah ama qiimaha jaban ee dugsiga. Macluumaadkan waxaa kaliya loogu baahan yahay wixii ujeedo ah eegitaanka u hogaansanka Gobolka ee shuruucda xuquuqda madabiga ah ee Federalka, oo jawaabtaadu ma saamayn doonto marka laguu qiimanayo arjigaaga, oo waxaa ilaalin kara Sharciga Sirta. Marka aad bixiso macluumaadkan, waxa aad naga caawinaysaa xaqiijinta in barnaamijkan loo maamulo si bilaa takoorka. |

**Fadlan kusoo celi arjigaaga si toos ah DUGSIGA ilmahaaga. HA ugu dirin boos, faakis, ama limeelka arjiga buuxa ama wixii su'aalo ah ee ku saabsan arjiyadaada Xafiiska (U.S. Department of Agriculture, USDA) ee Kaaliya Xog Hayaga Xuquuqda Madaniga ah ama u qalanka ilmaha ee cuntada bilaashka ah ama qiimaha jaban oo dib dhac ayaa ka imanaya.**